**Xeer lamb. 1 ee 31 Maarso 1961**

**Nidaamka Canshuurta Furdada**

**MADAXWEYNAHA KU MEEL GAARKA EE JAMHUURIYADDA**

Kadib markii u arkay qod. 62 ee Dastuurka.

Kadib markii uu arkay sharciga lamb 14 ee 29 Agoosto 1959 oo loo wakiishay Dowladda Somaliaya in ay soo saari karto nidaam cusub ee canshuurta furdada.

Kadib markii la arkay sharga lamb 16 ee 6 Abriil 1960 oo waqtiga uu dheere Dowladda in ay soo saarto nidaamka canshuurta furday iyo sharciga lamb 3 ee 20 Seteembar oo waqtigaas sii dheerey.

Kadib markii la dhegeystay aragtida Golaha Wasiiradaha.

Kadib soo jeedinta Ra'isul Wasaaraha.

**WUXUU XEEREEYAY**

**Qod. 1**
**Amarka Canshuur Furdada**

Wixi ganacsi ah ee dalka gudahiisa la keeno ama laga dhoofinayo waxaa ku waajib ah in laga bixiyo canshuurta furdada.

**Qod. 2**
**Waaxda Furdada**

Waxaa la dhisay Waaxda Furdada oo hoos timaad Madaxa Waaxda kaas oo hoos tegaayo Wasaaradda Maaliyadda.

Adeegyada dowliga markii la fulinaya howlaha howlada canshuuradka goobaha furdada waxaa qasab ah in loo hoggansandaoo xeerarka furdada ee Madaxa Waaxda Furdada.

**Qod. 3**
**Canshuurta Furdadooyinka**

Canshuurta waxay noqon karaan kuwa leh qiimo carifan ama waa kuwa la qiimeeyo ama lagu beddelo sharciga.

**Qod. 4**
**Aliquotada lagu Dabaqi karo**

Haddi isbedel canshuurta la gaaro, qiimaha wuxuu noqon dooaa kan hirgelisan waqtiga canshuurta la bixin doono.

**Qod. 5**
**Dhiibista Canshuurta, Xuquuqyada kale iyo Waajibaadka**

Wajiibaakdka canshuurta waxay wadata wajiib ah in la bixiyo wax allaliyo wixii ujuuro ah eek u waajibay xoolaha ganacsiga ah oo ay Hey'adda Furdooyinka ay codsadaan. Dhiibista ujuuradaha iyo canshuurta waa in la bixiyaa kadib markii la bixiyey canshuurta oo idil.

**Qod. 6**
**Xisaab Celin oo lagu Qaldamay**

Haddii canshuurta la qaaday ay ka yartahay intii laga rabay, amase dib loogu celiyey si qalad ah,waxaa kadib markii Madaxa Waaxdu codsado waa in uu dhiibo lacagta ku waajibtay ama uu soo celiyo lacagta sida qaladka loogu celiyey. Labo sano gudaheeda waa in lagu codsado dib u soo celintaasi.

**Qod. 7**
**Dib u soo Celin**

Lacagaha lagu bixiyey caanshuurta waxaa loo soo celin kara kadib markii Madaxa Waaxda uu amro sidaas iyadoo cidda xaq u leh ay soo codsatay muddo aan ka badneyn 2 sano.

**Qod. 8**
**Wakiilashad**

Ciddi sheegato in ay wakiil ka tahay hantilaaha xoolaha wuxuu si toos ah uga yahay mas'uul in uu bixiyo caanshuura. Wuxuu wakiil ka yahay in uu fuliyo wixii howl ah ee la xiriiro badeecadda oo uu wakiilka ka yahay.

**Qod. 9**
**Mas'uuliyadda Cidda Wakiilka laga yahay**

Waxaa hantiluhu mas'uul ka yahay falalka iyo qorallada uu qofka uu wakiishay bixiyey ee la xiriira badeecadda oo u wakiishay. Waxaa dhici karto in lagu xukmiyo in uu bixiyo lacag ganaax ah oo ka dhalatay fal uu wakiilku geystay, lakiin in ciriiri la geliyo xoriiyadiisa asbaab ama dembi uu wakiilku geystay ma qaadan doono, taas oo wixii fal dembi ah uu wakiilka ku koobnaan doona.

**Qod. 10**
**Dhismaha u Dhaw Xeebaha**

Ciddii ka dhisato dhismooyin ku meel gaar ama kuwa rasmi ah ama nooc kasto oo dhisma ah:

a) Ilaa 100 mitiir ee xeebta agaaga la deggen yahay ama dowladda hoose;
b) Ilaa 2 kilomitie ee xeebta.

Waxaa loogaga baahan yahay in uu ka haysto fassax Madaxa Waaxda. Haddii laga waayo wuxuu muteysan doonaa ganaax ilaa So 2,000 ama xarig aan ka badneyn ilaa 3 bilood ama labada la isku daray, wixii dhismo ah ee laga dhisay waxaa laga baabi'in doona, Qodobkaani ma lagu dabaqi karo dadka reer guuraaga ah oo si ku meel gaar ah aqallo ka taaga agaasi.

Fassaxa sare ku xusan lama diidi sabab la'aan.

**Qod. 11**
**Awooda Wakiilashada**

Madaxa Waaxda wuxuu u wakiilan karaa saraakiisha xafiiskiisa awoodihiisa iyo howlahiisa.

Ciddii uu Madaxa Waaxdu u wakiisho in uu fuliyo adeeg furdada wuxuu yeelan doonaa awood howlgal ee sarkaal furdadeed.

Shaqaalaha loo igmaday howlaha iyo adeega furdada amar Madaxa Waaxda wuxuu yeelan doona awood howl gal.

Howlaha la doonayey si sharci ah in lagu qabto goob carifan haddii lagu qabto meel kale amarka Madaxa Waaxda waxay la mid yihiin in la qabtay.

**Qod. 12**
**Maraakiibta iyo Dayuuradaha Dowladaha Ajaanibka**

Waxaa reeban in la baaro dayuuradaha iyo maraakib oo u socdo shaqo dal kale ee ajanabi ah, markii laga reebo in sarkaal u xilsaaraan uu u arko in markabkaasi ama dayuuradaashi ay sido shixno alaab ah oo aan ka mid ahayn kuwa caadi ahaan loogugu tala galay.

**Qod. 13**
**Saacada Shaqada**

Maalmaha iyo saacadaha shaqada waxaa go'aamin doono sharciga. Saraakiishu waxay dheereysan karaan waqtiga shaqada codsi dadweyne awgeed ama misaaniyaduu gunnoyinka howlaha dheeraadka ay jay kadib iyadoo la racaayo nidaamka iyo xad lagu cadeeyey xeraarka u gaarka ah.

**Qod. 14**
**Iskhilaafka Qiimeynta ama is Raac Raacsinta**

Haddii ay dhacdo in la isku khilaafo qiimeynta ama is raac raacsinta shixnooyinka si loogu dabaqo canshuurta, waxaa la faraya cidii soo rogtay ama dibedda geyn lahaa, ciddi loo dhiibi lahaa ama wakiiladooda in ay keyd furdada dhigan lacagta laga qiimeyey canshuurta taas oo muddo ilaa 2 bilood garsoorka ay khuseeyso ka gaari doono go'aan.

Haddii go'aankaasi ka dib, cansuurta laga rabay ay ka yartay lacagta horumaris ah waxaa loo celin inta saa'idka noqodo. Haddi iskhilaafkaasi aan laga gaarin do'aan muddada 2da bilood ama garsooruhu uu go'aamiyo sida ay furdadu codsatay waxaa lagu dari doona inti ka dhiman.

Waxaa wax lagu qiimeyn doona qiimaha lagu sheegay in ay shixnadu joogto, kadib markiilaga reebo awooda howlwadeenada furdada oo codsan karo in loo gudbiyo garsoore ka sareeya mid doodu ak taalay.

**Qod. 15**
**Keenista ku meel Gaarka ah**

Madaxa Waaxda wuxu amri karaa in la soo geliyo shixnado si ku meel gaar amas aan loogu tala gelin ganacsi haddii:

a) Badeecaddaasi dib loo celin doono muddo 3 bilood kadib markii la ogolaaday;
b) Ciddi loo ogolaado in uu keydsado badeecadda oo ay ku waajibtay canshuur amar Madaxa Waaxda kadib waxaa la farayaa in u keeno damiin.

Madaxa Waaxa wuxuu sababa jira awgeed dheereyn karaa muddada dib u dhoofista badeecadda.

**Qod. 16**
**Dhoofinta ku meel Gaarka ah**

Dhoofinta ku meel gaarka ah ee badeecaddaha wuxuu Madaxa waaxda u oggolan karaa muddo aan ka badneyn ilaa 3 bilood kaas oo haddii sababo kale ay jiraan la dheereyn karo.

## Qod. 17
## Didmada Keenista iyo Dhoofinta ku meel Gaarka

Wasaaradda Maaliyadda waxay dekreetoyin ku joojin karaan in shixnado si ku meel gaar ah aan la keenin sida ku qoran qod. 15 ama aan la dhoofin sida ku qoran qod. 16.

## Qod. 18
## Keenista ku meel Gaarka ee Baaburta

Iyadoo loo eegin  amarada ku qoran sharcigaan, baabuurta waxaa had iyo jeer loo keeni kara si ku meel gaar ah markii ay khuseeyso fulinta heshiisyada caalamiga ah ee Jamhuuriyada hoos yimaada.

## Qod. 19
## Marxaladaha Gaarka ah ee Fulinta ku meel Gaarka ah Keenista iyo Dhoofista

Keenista iyo dhoofista badeecaddaha ay keenistooda iyo dhoofistooda ay hoos imaanayaan xadiidaad waxaa la gelin karaa marxalado gaar ah. Fulin laa'anta marxaladasi waxay sababi doonaan ciqaabta sharcigu uu dhigaayo.

## Qod. 20
## Ganaaxada Marxaladaha Gaarka ah

Haddii uu sharcigu qoraayo in shixnado qaarkood ay ku waajibtay in caanshur dhiman la bixiyo ama la soo geliyo dalka gudahiisa canshuur la'aan sababo jira awgeed, ama dadka loo keenay ay u isticmaalaan si aanan loogu tala gelin am aka soo horjeeda marxaladda gaarka, ama ay ku dhacaan gacan ka duwan kuwii xaq u lahaa, badeecaddaasi waa lala wareegi doona haddii aanan gebi aahan la wada bixin canshuurta ku waajibtay.

Ciddi aanan fulin amarkaani waxy muteysan doonaan ciqaabta u qoran ganacsiga kontrabaanka.

Badeecaddahasi waxaa si kasto ha ahaate la iibin karaa, la wareejin karan haddo canshuurta oo lagu qiimeyey qiimahooda markii la iibinayey ama la wareejinayey, canshuurtaas oo loo xareyn doono dowladda.

Cidddi dalka keena shixnado oo sida ku qoran qodobadaan, diida in uu tuso howlwadeenada furdada oo u war gelin doono Madaxa Waaxda waxaa uu muteysan doona ciqaab loogu tala galay dembiga kontrabaanka.

## Qod. 21
## Liisaska la Diiday iyo Racfaankooda

Ciddii liiskooda musharaxiinta uu Guddomiyaha Degmada diido, waxay ciddii waakil uga ah u gudbin karaan ilaa iyo 45 beri ka hor maalinta doorashoyinka dacwad Garsooraha Degmada.

Garsooraha degmada waa in uu go'aan kama dambeys ah ka gaaray ilaa iyo 40 beri  ee ka horaysa maalinta doorashooyinka.

Haddii go'aan laga gaari waayo muddadas dhexdeeda, dacwado waxay noqon doonta mi la aqbalay.

**Qod. 22**
**Kontrobaanka**

Ciddii:

a) Isagoo ogsoon haysata, ama safrisa, keydisa ama qarisa shixnado am aka qeyb qadata falalkaasi sare ku xusan si kastaba ka ahaate ku dadaala in uu dhinac maro bixinta canshuurta ku waajibtay;
b) Isagoo ogsoon dhinac mara ama isku daya in uu dhinac mara bixinta canshuurta ama ka qeyb qata isku daya falalkaasi, am aka soo horjeesta shuruucda iyo amaradda qeybta canshuurta ee la xiriira badeecaddaha la keeno, keydinta iyo guddonkiisa, safrinta iyo dhoofiska badeecaddaha;
c) Si kas ah uga aamusa falalka diyaarad ama markab ama gaadidka lagu qaado badeecaddaha ee lagu amray in lala wareego am aka qeyb qaata fal ka gelin la’aantaasi.

Waxaa uu galaaya dembiga kontrobaanka ah wuxuuna muteysan doona ganaxa aan ka yareeyn 3 mar ama aanan ka badneyn 10 mar lacagta canshuurta ku waajibtay. Badeecaddaahaasi waa lala wareegi doona.

**Qod. 23**
**La Wareegidda Markab ama Dayaarad**

Waxaa lala wareegi doona maraakiibta ama dayuuradaha iyagoo maraaya dhulka ama biyaha Jamhuuriyadaa, diida in ay u hoggansadaan amarada xaqqa ee ay howlwadeenadda furdooyinka ay siiyan, amaba kadib markii la eryado ay turturaan badeecaddada ama ay baabi’iyaan si ay uga baqsadaan in lagu eedeyo dembiga ah kontrobaan.

**Qod. 24**
**Falka Kontrobaanka oo la Cusleeyey**

Ciddii ku kacda fal lid ku ah shuruucda canshuurta oo haddana hubeeysan, wuxuu muteysan doona ganaax u dhigma 10 mar qiimaha canshuurta ku waajibta shixnadiisa iyo xarig u dhigma 1 sano ilaa 3 sano.

Ciddii, iyado ay jiraan marxaladaha sare ku xusan, isticmaala hub geysan karo dhiibaatyooin iyo dhaawac howlwadeenada hey’adda canshuuraadka wuxuu kale oo uu muteysan doona kadib ciqaabta ku qoran faqradda sare xarig ilaa 10 sano.

Haddii falka sare ku xusan ay wada galaan si wada jir dad 3 iyo in ka badan, waxay muteysan doonan ganax kama yaraan doono laba u jibaar ee sharciga qoraayo, Qof kastana wuxuu muteysan doonaxarig ilaa 12 bilood kadib uusan dembigu ahayn mid ka culus.

Ciddii isago horay loogu xukmiyey dembi la xiriira canshuur, haddana dembi canshuur galo wuxuu muteysan doonaa dembigiisa labaad ganax aan ka yareeyn 6 jibaar qiimaha canshuurta ku waajibta badeecaddaha dembiga lagu muteystay. Dembi kasta oo ka dembeyey wuxuu muteysan doona xarig ilaa 2 sano.

**Qod. 25**
**Xorriyadda Xadidan iyo Daaminta**

Dadka loo xiro barwo la’aan kadib markii lagu eedeyey in aay jebiyieen shuruucda canshuurta oo ciqaabtoodu gaareyn xarig waxaa lagu sii deyn kara xorriyad xadiidan oo damiin u baahan.

Intii aanan la horgeynin gaarsooraha qaabilsan, wuxuu howlwadeenka canshuurta si deyn kara kabib markii la bixiyo damiin aan ka yareyn 2 kun.

Amaradda qodobkaan ma ay wax dhimi karaan awoodda garsooraha ama cid kasta oo amri kara in la sii daayo.

**Qod. 26**
**La Wareegidda Gaadidka**

Gaadidka lagu qaaday badeecaddaha kontrobaanka ah waa lala waarigi doonaa, haddii uusan hantileha caddeynin in gaadiidkaasi aan loo isticmaalin oo keliya in lagu fuliyo fal dembiyeedkaasi ama haddii qiimaha gaadidku uu si xoog leh uga badan yahay badeecadda dembiga lagu galay.

Maraakiibta jirmigooda uu ka weyn yihiin 250 kun oo tan waxaa sii deyn kara howlwadeenka canshuuraha ee awooda u leh kadib markii la hubsado in hantilaha markabku uu hoggan saana doono amarrada garsooraha qaabilsan.

**Qod. 27**
**Halka la Geeyn doono Badeecaddaha lala Wareegay**

Halka la geeyn doono badeecaddaha iyo gaadidka lala wareegay sida uu fassaxayo sharciga canshuurta waxaa lagu carifi doona xeer nidaamiyaha ay soo saarto Wasaaradda Maaliyadda.

**Qod. 28**
**Ciqaabta Guud**

Ciddii ay ku caddato in uu fuliyey fal dembi lid ku ah shuruucda canshuuraadka oo aan u qorneyn wax ciqaab ah, wuxuu muteysan doona ganax So, 200 ila iyo 1,200 ama garix 1 ilaa 10 sano ama labada ciqaabadood.

**Qod. 29**
**Musuq Maasuq**

Ciddii siisa ama u ballan qaada abaal gud alaabeed ama lacageed si toos ah ama si dadban qof howlwadeen canshuuraadka ah si uu fuliyo ama uusan fulin howl xafiiskiisa wuxuu muteysan doona ganaax So 1,000 ilaa 2,00. Haddii uu falka howlwadeenku ay sababto in qasaaro dhinaca faa'idada ay ka soo gaaro qeybta canshuuraadka, dembiluhu wuxuu muteysan doona xarig 6 ila 18 bilood iyo ganaax 1,000 ilaa 3,000.

Howlwadeenka canshuuraadka ee qaata abaalgudkaasi ama markii la siiyey uusan uu so sheegin saraakiisha ka sareesa, waa la ruqseyn doona. Haddii falkaasi uu sababay qasaaro canshuuraadka la xiriirta, dembiluhu wuxuu muteysan doona xarig 3 bilood ilaa 2.

**Qod. 30**
**Awooda aaga Sharciga**

Awooda aagaga xukunka dembiyada canshuuraadka waxay ku xirantahay goobta ay falalku ka dhaceen ama goobta uu ku sugan yahay qofka dambiilaha ahi.

**Qod. 31**
**Baarista**

Howlwadeenka ka shakiyo in shixnado aanan la canshuurin ama ay reeban tahay in dalka la soo geliyo ama qorallada la socda badeecaddaahaasi la gu qariyey guri ama goob kale ee ka tirsan dhulka Jamhuuriyadda, wuxuu amar ka heli kara gaarsooraha qaabilsan kadib markii u codsado in lo oggolado in uu baaritaan ku sameeyo goobahaasi lana soo wareego badeecaddaha aan la canshuurin, qoraallada la qariyey.

Haddii ay dhacdo in loo diido in la galo goobahaasi, wuxuu howlwadeenku awood u yeelanaya in si xoog ah ku galo halkaasi iskana qaado wixii culeeys ah ee halkaas la hordhigay.

Howlwadeenka ay ku qasbanaato in uu daba cararo cid lagu qabtay iyadoo ku dhex jirta falkaasi, wuxuu isagoo amar ka helin garsoorka qaabilsan uu isticmaali kara awoodaha ku qoran faqradda sare. Marxaladaasi kadib waxaa waajib ku ah in uu warbixin siuo garsooraha 24 saac gudahooda.

**Qod. 32**
**Kormeerka**

Howlwadeenka canshuuraha wuxuu awood uu leeyahay in uu kormeero qeyb kasta ee ka tirsan dalka Jamhuuriyadda, wuxuuna geli kara goob kasta oo aanan ahay guri ama dhisma kale si uu fuliyo howlihiisa kormeerka ah. Howlwadeenkaasi laguma soo oogi karo dacwo ciqaabeed ama madani ee la xiriira howshiisa kormeer.

**Qod. 33**
**Culeeyska Caddeynta**

Waxay dul saarantahay ciddii la soo eedeyey in uu muujyo caddeymaha la xiriira halka ay shixnaduhu ka yimadeyn, in uu bixiyey canshuurtii lagu lahaa, in uu si sharci ah shixnaduhu uu ku soo geliyey dalka, ama ku wareejiyey, ama keydiyey ama uu u dhoofiyey.

**Qod. 34**
**Qiimaha Badeecaddaha**

Wasaaradda Maaliyadda ayaa iska leh awood in ay soo saarto xeer nidaamiye caddeynaya sida lagu qiimeyn karo badeecaddan si loo helo canshuurta ku waajibta iyo ganaxyada.

Haddii ay surto gal ahayn in la qiiyaaso qiimaha badeecaddaha si loo saaro ganaax waxaa lagu qiyaasayaa in qiimuhu yahay ilaa So 3,000 ama qiimaha badeecaddaha oo lagu cabirayaa in aysan ka badneyn qiimaha ah So 3,000.

**Qod. 35**
**Maxkamadeynta**

Iyadoo la dhowrayo xeendabka sharciga, howlwadeenadu waxay awood u leeyihin in ay maxkamadeeynta falalka lid ku ah shuruucda canshuuradka, sidaas awgeedna ay ka qeyb qaadan karan maxkamadeeynta heer kasta ha joogaane.

Caddeymaha howlwadeenka canshuuraha ee la xiriira qiimaha badeecaddaha waxaa ka mid ahaan doonan cadeeymaha qiimaha.

**Qod. 36**
**Tir Tirmada fal Dembi**

Falal dembiyeedka la xiriira canshuuraadka wuxuu tir tirmi karaa 5 sano kadib markii fal dembiga la galay.

**Qod. 37**
**Ganax Lacageedka ugu Yar**

Garsooruhu ma dejin karo ganaax lacageed eek a yar inta uu sharciga canshuuraha ama sharci kale.

**Qod. 38**
**Amaradda Maamulka**

Waxaa awood gaar loo siiyey Madaxa Waaxda, in uu soo saaro amara maamul oo la xirira ganaxa lacageed kadib markii la bixiyey lacag aan ka yareen 2 u dhig ganaxaa loogu tala galay fal dembiyeedkaasi iyo kadib markii laga wareegay badeecaddaha fal dembigu ka dhashay sida uu sharciga tilmaamay.

Madaxa Waaxda wuu iska dhaafi kara haddii ay la noqoto in dembigu uusan weyneeyn.

Wasaraada Maaliyadda waxay soo saari karta xeer nidaamiye oo lagu soo qondeyn doono amaradda maamulka.

**Qod. 39**
**Qeybiska Ganaaxyada iyo Dakhliga laga hela la Wareegidda Badeecaddaha**

Wasaaradda Maaliyaada ayaa soo saari kara xeer nidaamiye kala caddeyn doono habka kala qeybiska dakhliga ganaaxyada iyo beeca badeecaddaha lala wareegay, gaadidka lala wareegay iyo kala qeybinta abaalmarinta.

**Qod. 40**
**Xeerarka**

Wasiirka Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay in uu soo saro xeerarka si loo fuliyo sharcigaan:

a) Habka si ku meel gaar ah looga dhoofin karo badeecadaha iyo qiimeynta canshurta ku waajibta markii la soo celin doono;
b) Habka si ku meel gaar ah loo keeni karo dalka gudahiisa badeecad iyo qiimeynta canshuurta ku waajibta;
c) Wajiibaadka hantileeyaasha, amiir baxarka, wakiiladaha iyo ciddi kale ee soo deggidda iyo dhoofiska rakaabka, markii ay imaanayaan dejinta iyo raridda badeecooyinka, qabka imaatinka iyo bixinta maraakiibta, dayaaraddaha , baabuurta iyo gaadidka kaleba;
d) Dhismaha iyo shaqeynta baqaaradda iyo meelaha kale ee keydka ah, kala soo bixinta badeecooyinka iyo qaabka mareeynta goobaha keydka;
e) Qol yar;
f) Safarka dhexe;
g) Keenista iyo dhoofiska badeecooyinka;
h) Dhoofiska iyo keenista dhinaca adeega boostada;
i) Awoodaha, shaqada iyo waajibaadka howlwadeenadda canshuuraaha oo k aka mid yihiin awoodda baaritanka dadka, maraakibta, dayaaradaha, baaburta, dhismooyinka iyo goobaha iyo in bixin karaan amarro, in ay xiri karaan dad baddecana xayiri karaan;
j) La wareegidda badeecadaha, maraakiibta, dayuuradaha ama gaadidka ee la xiriira falal dembi ee canshuuradka;
k) Qorrallada loo bahan yahay in la buuxiyo ama lagu dhiibo wixii lacag ah;
l) Damaanadah iyo marxaladaha ee waqti dheereysi iyo fulinta qasabka ah;
m) Badeecooyinka laga tago iyo habka lagu dhaqi doono;
n) Saacada howlaha xafiisyada canshuuraadka ay shaqeeyaan,gunnoyinka shaqaalaha ee waqtiga dheeraadka ah iyo kharajyada kale oo dheeraadka ah.
o) Wakaaladaha kastamka

**Qod. 41**
**Eraybixin**

— Erayga "shurucda canshuuraha" waxaa ka mid ah sharcigaan iyo shuruuc kasto ee la xiriira canshuurada fudooyinka ee la xiriira sharciga furdaha ee goob kasta ee dalka;

— Erayga' badeeca' waxaa loola jeeda nooc kasto ee alaab ah, qalabka iyo xoolaha.

— Erayga 'howlwadeen canshuuraha' waxaa ka mid shaqaalaha (iyadoo laga reebay kuwa hoose- u shaqeeya Waaxda Furdada, askarta Booliska ee canshuurta ama ilaalada canshuurta, ama ciddii ku howl lan adeegga canshuuraha. Fulinta howlaha canshuuraada, howlwadeenadu waxay leeyihin isku awood oo uu sharcigu siiyey.

— Erygga 'howlwadeen qaabilsan' wuxuu tilmaamayaa howlwadeenka furdada oo leh awoodda iyo wajiibaadka in uu fuliyo ama amro fulinta fal gaar ah.

— Erayga 'aaga canshuuraha' wuxuu caadeynah goob oo uu Madaxa Waaxdu uu ugu tala qeyb wax lagu canshuuro.

— Erayga' Jamhuuriyad' waxaa loola jeeda Jamhuuriyada Somaliya eek a kooban dhulka Somaliya, biyaha ilaa 6 miglia marina, oo lagu qiiyaasay xariiqinta la siman xeebta laga arki karo badda markii ay ad u kacsan tahay.

**Qod. 42**
**Burin**

Waxaa la buriyey shuruucda sida ku qoran kuwa lid ku ah ama aanan la socon Karin xeerarka halkaan ku qoran laakin shuruuc weli awood ayey leeyihiin intii laga soo saari doono shuruuc kale:

a) Dekreeto lamb. 2049 ee 12 Luulyo 1938 "Xeerka caanshurada furdooyinka ee Afrika Bari;
b) Xeerka lamb 2143 ee 20 Febaryo 1939 "Xeeerarka guud ee xadideynta xadgudubka xeerarka maaliyeed ee Libiya iyo Afrika Bari ee Talyaaniga' inta ka khuseysa qeybta canshuuraha;
c) Dekreetada Wasiirka ee 15 Maarso 1939 Xeerara khuseeya keenista iyo dhoofista ku meel gaarka ah ee badeecooyinka ee Afrikada Bari ee Talyaaniga;
d) Amar furdoonyinka, 1952;
e) Amarka furdooyinka, 1953;
f) Qod. 7 ee dekreeto lamb 158 ee 24 Disember 1954;
g) Xeerka kastamka, 1959.

**Qod. 43**
**Hirgelinta Sharcigaan**

Dekreetadaan sharci wuxuu noqon doona Sharciga Furdada wuxuuna hirgeli doona 31 Maarso 1962.

Sharcigaan waxaa lagu keydin doonaa Keyda Rasmiga ee Shuurucda iyo dekreetoyina waxaa lagu soo daabici doona Faafinta Rasmiga ah.

Waxaa la farayaa cid kasto in uu hoggansanaadaan uuna u hoggamiyaan cid kasta si sharci ah dalka Jamhuuriyadda Wixii qalab ah ee soo haray wuxuu ku wareejin doona Xoghaaha.

Howlahasi waa si hufan loo qabto muddo yar kadib markii Guddomiyuhu uu caddeyo in coddeynta la bilaabi doono.

Muqdisho, 31 Maarso 1961.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirashid Ali Shermarke**

Wasiirka Maaliyadda
**Abdulqadir Mohamed Aden**

Waa la arkay waana lana diwaan geliyey Diwaan lamb 7 bogga 32
Muqdisho, 31 Maarso 1961.
Xisaabiyaha Guud: **Ahmed Dahir**